

Ma Tahay Waalid



Waa Hawl iyo Shaqo Adag!

Inaad waalid noqoto ma'aha arrin sahlan. Adigoo isku dayaya inaad isu dheelli-tirto shaqo, daryeelka gurigaaga, korinta carruuta, ahaanaya lammaane debacsan oo daboolaya baahida reerka waxay waalid kasta saari kartaa culays iyo kallif.

Sidee Ayaad U Maaraynaysaa / ugu Adkaysanaysaa?

Raac talooyinkan oo kaaga yimid Xarunta Waalidnimada Kartida leh si aay kaaga gargaarto inuu walwalka kaa yaraado.

- ◆ Aqoonso oo garo dareenadaada. Marka aad dareento in welwel iyo walaac kugu soo socdaan, qiro oo adiga aan inkirin qaad tilaabooyin aad ku xakamayso halkii aad u hoggaansami lahayd inuu adigu walwalku kula wareego.
- ◆ Sammayso Xirfado iyo aqoon wacan oo dhibaato ku xaliso. Marka ay ku soo wajahdo dhibaato kugu abuuraysa welwel ama walaac, samee diiwaan qaababka aad ku maarayn karto dhibaataada, qiimee inta door ee kala duwan ee aad haysato, go'aana gaar.
- ◆ Xaalad Caafimaad Ku Sugnoow. Joogtee cunta si wacan isugu dheelli-tiran, markasta jimicsiga hakuu ahaado mid xariirsan si aad ula dagaasho walaaca iyo welwelka. Nafaqo jirkaaga u habboon waxay ku siisaa tabar aad walaaca kula dagaasho. Jimicsiyo sammee ama yeelo ka helitaan dhaqan aad joogtaysatay oo kaa caawin kara inuu yareeyo inaad gasho isku-buuqsanaan.
- ◆ Gargaar weydiiso. Marka aad dareento walaac, dareenkaaga la wadaag saaxiibadaada aad aamin-santahay iyo xubnaha qoyskaaga. Haddii aad dareento inuu kaa tiro batay aanad xakamayn karin, la hadal daryeel caafimaad bixiye si aad u barato si ka sii wacan, firfircoon oo aad walaaca ku xakamayn karto.

Talooyinkan waalidka waxay ka timid Hay'adda Adeegga Carruurta ee Degmada Franklin halkaasoo aan u ula-olayno amniga, faya-qabka iyo Deegaanka joogtada ah ee canugga.
childrenservices.franklincountyohio.gov. • 614-275-2523